Qanuunka EGAEB- Qanuunka Internetka

Iskuulaadka Dad-weynaha Denver waxay bixisaa adeegyada shabakadka aag fog oo xarrumaha degmo dugsiyeedka midba midka kale ku xirta iyo guud ahaan Internetka. Helitaanka internetka ilo gaar ah oo baaxada leh ayaa waxay siisaa ardayda iyo macalimiintaba. Hadafka Degmo dugsiyeedka waa in adeeggan ay iskuulada u fidiso si loo hormariyo fursaddaha waxbarashada iyada oo ay gudbinaysa sida ilaha wadaaggo, hal-abuurka, iyo isgaarsiinta. Internetka waa shabakad elektroonig ah oo isku xira malaayiin kombiyuutar iyo shaqsiyaad caalamka oo dhan ku kala suggan. Wuxuu isku xiraa shabadaha gobolka iyo hay'addaha dowladda ee isku wada xiran. Howl toosan ee shabakada taasoo guud ahaan degmada iyo caalamka isku xiri karta helitaankeeda waxay ku xiran tahay isticmaale kasta hannaanka wanaagsan ee udhaqmo.

Isticmaalayaasha waa in ay dhowraan xeerarka sharcigan si ay u helaan oo uuna si habsami ugu socdo shabada. Gef kasta oo loogeysta qodobada sharcigan waxay dhelin kartaa:

***** in lagaa joojiyo isticmaalka

***** in mustaqbalka laguu diido isticmaalka

***** in ay suurtogal tahay in lagaa qaado tallaabo edbin ah.

Qeexitaan:

1. **Howlaha sharci darada –** waxaa ka mid ah, balse kuma koobna oo kaliya, howlo kasta oo gef ku ah sharciyada dowladda hoose, tan gobol, iyo/ama dowladda dhexe.

2. **Howlo saqajaannimo** – waxaa ka mid ah howlaha gefka ku ah heerarka bulshada ee guud ahaan la ogol yahay in loo isticmaalo qalabyada isgaarsiinta ay dad-weynaha leeyihiin. Tani waxaa ka mid ah soo saarista ama isticmaalka walxaha muuqda ee galmada la xiriira.

3. **Isticmaalka aan habbooneyn** – waxaa ka mid ah howl kasta ee la qabto oo gef ku ah sharcigan ama howlo dheeraad ah ee loo aqoonsan yahay in aysan ku habbooneyn maareynta nidaamka.

4. **Maareeyayaasha nidaamka –** shaqaalaha degmo dugsiyeedka oo ay howshoodu tahay ama ka mid tahay in ay kor kala socdaan shabakada kombiyuutarada degmo dugsiyeedka.

5. **Macluumaad halis ah** – macluumaad haddii lagu dhaqaaqo keeni kara waxyeello, halis keeni kara, ama sababi kara inay istaagto howsha degmada ama jaaliyadda guud ahaan.

6. **Halis geliya ammaanka shaqsiga** – diba u soo dhigga macluumaadka shaqsiga ee la xiriira iyaga ama shaqsiyaad kale.

Degmo dugsiyeedka waxay fidisaa oo ay joojisa in la helo waxyaabaha la xiriira saqajaanimada, galmada, ama walxaha waxyeellada u gaarsiin kara kuwa da'da yar. Degmo dugsiyeedka marnaaba hubaal kuma siineyso in aaddan la kulmeyn waxyaabaha sidaas oo kale. Shabako

caalamka ku baahsan waa wax aan suurtogal ahayn in la xigmeeyo dhammaan walxaaha, oo xitaa dadka caadiga ee isticmaala ayaa si sahlan la kulmi kara ama ka hor iman kara walxo muran dhalin kara. Degmo Dugsiyeedka waxay aaminsan tahay in macluumaadka qiimaha leh iyo isdhexgalka la heli karo ee ku aaddan shabakada caalamka isku xirta ay ka faa'ido badan tahay suurtogalka ah in isticmaalaha helo walxaha aannan aan barbarsocon hadafka waxbarasho ee degmo dugsiyeedka.

Isticmaalka shabakada Degmo dugsiyeeda waa mudnaan gaar ah, oo xuquuq ma ahan, oo waa in isticmaalayaasha oo dhan ay sidaasi oo kale u isticmaalaan. Isticmaalka aannan haboonayn waxay dhalin kartaa in lagaa joojiyo mudnaanta gaarka ah ee lagu siiyay. Howlahan soo socda way ka mamnuucan yihiin:

1. In shabakada Degmo dugsiyeedka loo isticmaalo wax kasta ama in lagu taageero ficilada sharci darada ah ama foosha xun, iyo/ama isticmaalka waxyaabaha aannan habooneyn.

2. In shabakada Degmo dugsiyeedka loo isticmaalo wax kasta oo aannan ku habooneyn ee aanan howsha iskuulka la xiriirin iyo/ama sababo ganacsi, sida iidheh oo kale, ama lagu taageerayo howlo siyaasad kasta ama olole kasta.

3. In la kharribo shabakada ama ilaha shabakada, taas oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobnayn, in loo geysto waxyeello, burburin, ama in macluumaadka wax laga bedello shabakada Degmo dugsiyeedka, oo uu ku jiro faayrus kombiyuutar kasta.

4. Isku day ah in la helo macluumad la xadidey ama kuwa kale laga joojiyo isticmaalka shabakada.

5. Isticmaalka af-lagaadada ama luqad guud ahaanba ah aflagaado, cay, kadeedis, ama hanjibaad ku socota shaqsiyaad iyo/ama koox.

6. Sameynta ama isticmaalka macluumaad halis ah.

7. Gefafka ku aaddan xuquuqda daabaca ama fargellin lagu sameeyo heshiisyada shatiga. Tani waxaa ka mid ah, laakiin aysan ku koobnayn, barnaamijyada, qoraal aan qofkii asalka ahaa la sheegeyn, garaafiks, sawirro, macluumaadka elektaroonigga, ama fargellin lagu sameeyo xuquuqda shaqsiga ama shirkad iyadoon oggolaansho loo haysan. In la xado macluumaad ururisteeda loo isticmaaley shabadka Degmo dugsiyeedka ayaa sidoo kale mamnuucan. Isticmaalayaasha aan milki ahaan la'hayn walxaha lagu soo gudbiyo shabakada Degmo dugsiyeedka, aysan ka ahayn sida walxaha haddii kale ay kooban xuquuqda daabacaada.

8. Bixinta helitaanka shabakada Degmo dugsiyeedka aan isticmaalayaasha loo fasaxin.

9. Wadaagidda lambarka sirta ah ee koontada mailka, lambarka sirta ah loogu talo meela qof kasta arki kara, ama kombiyuutarada loogu tago adiga oo "galey" oo aadna ka maqan tahay.

10. Ammaanka shaqsi wax qalqalgelinaya.

11. Inta carruurta yar loo oggolaado in ay isticmaalaan walxaha internetka ku jira ee aannan ku habbooneyn.

12. Daah ka qaadista, isticmaalista, iyo kala saar-saarida macluumaadka shaqsiga ee ku saabsan carruurta yaryar.

Degmo dugsiyeedka, wuu addeeci doontaa qodobka labaad ee xeerka hagaajinta macluumaadka baroodbaandiga, caam ahaan loo yaqaan sida, "xeerka ilaalinta carruurta ee qarniga 21aad" oo aan ugu magacaabeyno “halkan, "xeerka”), ee uga baahan iskuulada iyo maktabaddaha ee la siiyo qiimo-dhimista e-sicirka (e-rate) in ay sameeyaan oo ay hormariyaan ololaha wacyigelinta dad-weynaha ee isticmaalka iyo ammaanka internetka iyo sidoo kale in ay la yimaadaan tabo ammaan ee isticmaalka internetka. Waxaa intaa dheer, in ardayga iyo isticmaalayaasha Degmo dugsiyeedka la baro waxyaabaha ku saabsan qaabka habboon ee isticmaalka, oo ay ku jirto balse kuma koobna oo kaliya, isdhexgalka shaqsiyaadka kale ee bogga internetka isku-xirka bulshada, qololka lagu sheekeysto, iyo ololaha internetka isku boocboocsi iyo fahamka sida iyo waxa ay tahay jawaabta habboon ee la qaadayo. Sababtaas darted, Muraaqibka ama qofka/qofta oo ka tirsan waaxda Degmo dugsiyeedka, iskuulka, iyo barnaamijka u magacaaban ayaa waxay hal qof ama shaqsiyaad ka badan ay u bagaabi kartaa in ay sameeyaan qabyo qoraal, tafatiraan, dib u saxaan oo ay qeybiyaan xeerar, hannaan iyo tabo lagu hormarinayo isticmaal internetka ammaan u noqdo shaqsiyaadka degmo dugsiyeedka, ardayda, carruurta iyo isticmaaliyaasha internetka Degmo dugsiyeedka looga baahan yahay in ay hadda ama wixii ka dambeeya ay fuliyaan xeerka isticmaalka.

Warisgaarsiinta lagu gudbiyo shabakada Degmo dugsiyeedka ma ahan mid shaqsi gaar u ah oo shaqaalaha Degmo dugsiyeedka waxaa dhici karta, in ay ku jiraan howsh ilaalinta shabakada iyo gacan ku haynta, dib u eeggida iyo kormeerka qeybaha ama fariimaha ku jira. Degmo dugsiyeedka waxay xaq u leedahay in ay ilaaliyo oo way isticmaali doonaa diiwaangelinta la keydsadey iyada oo haysta sabab suurtogal ah ama aysan haysan si ay markaa u hubiso in addeecayo sharciga u yaal.

Degmo dugsiyeed wax hubaal ah kuma siineyno in howlaha nidaamka shabakada ay buuxin doonto shuruudo gaar ah. Degmo dugsiyeedka mas’uulna kama ahan waxyeellada kaa soo gaarra isticmaalka shabakada. Tani waxaa ka mid ah lumista macluumaad, waxaan dirsoomin, wixii si qalad ah loo diro, ama adeegga hakadka ku yimaada. Isticmaalka macluumaad kasta ee loo soo mara shabakada Degmo dugsiyeedka halisteeda isticmaalaha ayaa iska leh. Degmo dugsiyeedka waxay si gaar ah u diidayaa in ay qaado wax mas’uuliyad ah ee ku saabsan macluumaadka ardayga uu Internetka uu ka heley saxnimadooda ama tayadooda.

Xeerka waxaa la qabatimey: 17 Juun, 1999

Dib-loo hagaajiyey: 21 Maarso, 2002

Dib-loo hagaajiyey: 21 Juun, 2012

TIXRAACA GUDUBKA. : EGAEA - Electronic Mailka

LEG. TIXRAAC: Xeerka Ka Ilaalista Internetka Carruurta (Pub.L. 106-554)